

DHAXALREEB

XARUNTA DHAQANKA EE HARGEYSA



Maanso "Miski"
Rashiid Sh. Cabdillaahi

Guuldarrada
Filinsamaynta
Soomaalida
Ibraahin Yuusuf
Axmed "Hawd"

Saddex Goor
Xaq Mudan
Xasan Daahir
Ismaaciil "Weedhsame"

Traveling: The Art
of Serendipity
Donia Jamal

Dhaxalreeb - ISSN 2074-028X

Tirsiga 1/2018

Soosaare

Karunta Dhaqanka ee Hargeysa

REDSEA Culture Foundation

Ponte Invisibile Edizioni

www.redsea-online.org

admin@redsea-online.org

Tifaftire guud

Dr. Jama Musse Jama

jama@redsea-online.org

Tifaftire iyo soosaaraha cadadkan

Ismaaciil Cabdillaahi “Ubax”

ismail.abdillahi@redsea-online.org

Sarwirka Jaldiga

Ciise Muuse

Wakiillada gobollada iyo debedda

Ka eeg bogga

<http://www.redsea-online.org/dhaxalreeb>

Qoraalka ku socda tifaftiraha

Email: dhaxalreeb@redsea-online.org

Buugaagta la faallaynayo

Karunta Dhaqanka ee Hargeysa

Golaha talabixinta iyo tifaftirka

Cabdalle Ducaale Wacays

Siciid Jaamac Xuseen

Sahra Jibriil

Cabdalle Cismaan Shafey

Cabdillaahi Cawed Cige

Maxamed Ibraahin Warsame “Hadraawi”

Rashiid Sheekh Cabdillaahi “Gadhwayne”

Kasan Cabdi Madar

© 2018 Xuquuqda qoraalkani waxay u dhawran tahay soosaaraha wargeyska.

TUSMO



- 06 **Guuldarrada Filinsamaynta Soomaalida**
Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"
- 09 **Marxaladda saddexaad ee maansada Hadraawi**
Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"
- 15 **Tamashle**
Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"
- 18 **Saddex Goor Xaq Mudan**
Xasan Daahir Ismaaciil "Weedhsame"
- 20 **Maanso "Miski"**
Rashiid Sheekh Cabdillaahi
- 24 **Warbixin Kooban Barnaamijyadii u Dambeeyay**
- 37 **Traveling: The Art of Serendipity**
Donia Jamal
- 39 **Hargeysa Ideas II, 2014 in Conversation with Nuruddin Farah**
- 45 **Wednesdays' evening are taken in Hargeisa!**
Tirsit Yetbarek
- 49 **The Gentle Lioness Sleeps (In Memoriam: Yoliswa Siyolwe)**
Mpalive Msiska
- 50 **Qolqolka Shaxanka ee Xarunta Dhaqanka Hargeysa**
- 52 **Rugta Kutubta**

Dhaxalreeb - Muraayadda Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa, 2009-2018

Jaamac Muuse Jaamac

Dhaxalreeb waa xogxejiye sannadkiiba dhowr goor uga soo baxa Hargeysa qaabab kala duwan (ku daabacan waraaq, ku qaybsan mareegaha PDF, ku codaysan cajalado). Tan iyo markii uu bilaabmay oo ahayd sannadkii 2009-kii, waxa uu ahaa muraayadda Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa ee laga dheehan karo hawla-ha dhaqan, shaxan, waxbarasho, fan, faaqidaad, xusuusxejin, dood-wadaag iyo kaydba leh ee ka socda Xarunta. Waana hage aqooneed oo ay ku soo baxaan qoraallo cilmbaadhiseed oo aan kalgal sugaran lahayni.

Sannadkan oo Xarunta Dhaqanku marti gelin doonto Bandhiggii 11aad ee Buugaagta Hargeysa, 40-guuradii aasaaska Ururka Caalamiga ah ee Cilmib-aadhista Soomaalida oo ku beegan Shirwaynihii 13aad iyo Furitaanka Rasmiga ah ee hoyga cusub ee Xarunta, Dhaxalreeb waxa uu isna yeelanayaa soo bixitaan joogto ah, tifatire cusub iyo gole talineed oo ballaadhan.

Bandhigga Caalamiga ah ee Buugaagta Hargeysa waxa uu soo afmeeray tobankii sannadood ee u horreeyey ee ololaha dhigaalcurinta, akhriska iyo qoraalka noocayadiisa kala duwan. Ololahaas waxa baalal u ahaa Bandhigga Hargeysa iyo Buugaagta Wareegta, oo iyada oo la kaashanayo Naadiyada Akhriska, lagu dhiirri gelinayay in waddanka laga furo rugo wax akhris meel kasta. Guusha ololahaasi waa mid muuqda oo tirada buugaagta la soo saaray ee Soomaaliga ku qoran iyo goobaha wax akhriska magaaloyinka dalku ba ay aad u koreen. Tiro ahaan markaa meel wanaagsan baynu maraynaa.

Tobanka sannadood ee hadda bilaabmay waxa ay hawl-wadeennada Xaruntu xoogga saari doonaan tayaynta, mar haddii tiradii meel wanaagsan i noo marayso. Dhaxalreeb wejigiisa cusubna waxa uu ka turjumayaan tayaynta qoraalcurinta iyo waxqorista, waxaana aan ku han weynahay in uu noqon doono maraggii isbeddelka tayadaas.

Akhris wanaagsan



Guuldarrada Filinsamaynta Soomaalida

Ibraahin Yuusuf Axmed
"Hawd"



Waxbarashada cusub ee dalkeenna ka bilaabatay sannadihii 1930-nadii, fan heeseedka iyo fan masraxeedka iyaguna ubax dillaacsaday qaybtii dambe ee 1950-nadii, iyo maansadii waddaniyadeed ee xoogga lahayd, iyo dabadeed dawladnimadii la qaataay 1960-kii, iyo haddana magaaloobiddii weynayd, intaaibaa wax ay ahaayeen maayado isbadajoog ah oo isbeddel bulsheed siday. Arrimahaas oo dhami waa astaamaaha cusboonaynta iyo dardar gelinta ilbaxnimada ummadeed. Haddaba aynnu jalleecno fanka loo yaqaanno filin sida uu dhaqanka cusub ee soomaalidu ku noqday iyo halka ayis la mareen.

Haddii aynnu aragnay in tacliinta, fan heeseedka, fan masraxeedka, iyo maansadaba cusboonayn weyn oo fikirka iyo dhaqanka bulshada beddeshay ku dhacday, fanka filinku sidee buu noqday? Jawaabtu iyada oo kooban, fankaa u gu ma aynnaan guulaysan sidii hawlah kale ee aynnu soo xusnay. Sababtu wax ay ahaydba, tobannaan sannadood oo la ga joogo bilawgii cusboonaynta aynnu ka hadlayno, maanta weli fanka filin samaynta caydh baynuu ka nahay.

In kasta oo iskudaygii kowaad ee hawshani ku beegnaa badhtamihii sannadihii 1970-nadii, sida flinkii tayada liitay ee Dan iyo Dookh, aqondarrada iyo fashilka taa innaga haystaa weli waa halkii. Marar badan oo badan baa la arkay tijabooyin arrintaas ku saabsan, giddigood se is ku si ayay u fashilmee, dhinac walba oo la ga eego. Flinkii u gu kharashka badnaa ee la ga maalgeliyay khasnaddii Qaranka Soomaaliyeed, oo ahaa kii la ga jilay Maxamed Cabdulle Xasan, in kasta oo wax badan loo huray, oo xitaa shisheeye lacag la gu siiyay,

sida la og yahay aad buu u qими liitay, xagga soosaaridda, jilitanka iyo dhan walba, wuuna noqon waayay wax naf leh oo ay bulshadu xiisayo kana sheekayso.

Fadhiidnimada ama guuldarrada filin samaynta soomaalidu iyada oo guud ahaanba qayb ka ahaan karta dibudhaca iyo burburka ku habsaydamdha dhaqanka iyo fikirka oo dhan xilligii dambe ee filinku hanaqaadi lahaa, haddana mid baa u sii dheer. Waxaa la og yahay filin samayntu in ay tahay mashruuc baaxad leh oo isu gu dhafan xirfado iyo aqoono badan oo la isu gegeeyo, aqoonahaas oo giddigood u baahan takhasus. Waxaa loo baahan yahay cid soosaaridda aqoon u leh, cid duubista ku wanaagsan, cid jilitanka u jajaban, cid muuqalka diyaarin taqaan, cid farsamada codaynta baratay, cid ilaysinta ama iftiiminta dhab u garanaya, iyo shaqooyin kale oo badan. Kaalin walba oo kaa-limahaas ka mid ahi waa lamuhuraan si loo helo filin hagaagsan oo dhammaystiran. Mid qudha oo kuwaa ka mid ahi haddii ay meesha ka maqan yahay dhaliisheedu wax ay ka muuqanaysaa natijada hawsha. Xirafadahaas oo dhan baa haddaba filin samayntenna ka maqan.

Maxaa keenay xirfadaha ka la duwan ee filan samaynta loo adeegsado in aynnaan lahayn, ama innagu yar yihiin? Arrimo badan oo isbiirsaday baa sabab u noqon kara. U gu horrayn waa la og yahay tacliintu sideedaba weli in aanay ina biyadigin. Taa darteed qofka waxbarasho waqtii ku bixinayaa badanaa wax uu u jeestaa xirfad la is la yaqaan oo risiq la gu la soo bixi karo, farsamooyinka filinkuna ma ay ahayn wax hirgalay oo la yaqaan. Dhanka kalena la ma helin maamul dawladeed oo arrinta bulshada

ku dhiirrigeliya ama u fududeeya. Kolka saddexaadna saboolnimada bulsheed baa xayirtay in si fudud loo helo alaabada filin samayntu u baahnayd oo badanaa qimo badan jooga, sida kamaradaha.

Aqoon la'aanta filinka innaga hay-sataa wax ay ina xusuusinaysaa fan masraxeedka oo aad u taabbagalay qudhisa sida aynnu u gu liidan-nay soosaariddiisa habboon. Run ahaantii ruwaayadda soomaaliyeed curinta halaburkeeda mooyee arrimaheeda kale weligood ma ay gaadhin heer la gu magacaabi karo ruwaayad dhab ah. Tusaale ahaan soosaaridda ruwaayadda iyo idil ahaan farsamooyinka kale ee loo baahan yahay, loo ma kaashan jirin aqoon nadaamsan, wax ay se is ka ahayd bawsi, mana jirin jilaa qudha oo fanka jilitanka dugsi ku soo bartay. Qof wal oo ruwaayada-ha daawan jiray wuu og yahay wixii rafaad iyo silic ka taagnaa codka, ilayska iyo guud ahaan golaha matalaadda. Hal codbaahiye ama laba masraxa ka dhex taagan ayay jilayaashu marka ay hadlayaan u kaltami jireen oo qofba markiisa loo bannayn jiray, xaaladdaasina wax ay dhabqin jirtay habsamida iyo qulqulka iyo dabadeed runnimada fanka la daawanayo. Halkaa waxaa ka wada muuqda saboolnimo aan qalabkii jilitanka la ga haqab la'ayn, iyo farsamo xumo ku timid iyada oo aan aqoontaas cilmi ahaan loo baran. Waana is la labada ammuurood ee la dhihi karo filin samaynta ayay caqabad ku noqdeen.

In aanan weligay arag filin soomaaliyeed oo macno ii yeeshaa darteed baanan dan u ga gelin haddii aan maqla mid la hadalhayo. Maalin dhowayd baa haddaba la ii sheegay in magaaladan aan deggan ahay ee Göteborg la keenay filin ay dad

soomaaliyeed Ingiriiska ku sameeyeen. Bal soo daawo oo aragtidaada na la wadaag, ayaa la iga codsaday. Fiid Jimce ah oo filinku socday baan taw idhi oo bartii la ga dhigayay is ku sii daayay. Filashadayda oo aan wanaagsanayn baan daawasho u fadhiistay. Dabadeedna? Alla mxaa i geeyay! Qaab darrada loo soo bandhigay baa ka sii darrayd.

Marxaladda saddexaad ee maansada Hadraawi

Ibraahin Yuusuf Axmed ” Hawd”

Maxamed Ibraahin Warsame ”Hadraawi” waa ninka isirka soomaalida u gu maanso badan u guna maanso wacan. Hadalkaasi wax uu dhadhami karaa go'aan macangagnimo ku karto, waayo bulshadeenna nafsiyad ahaan ka la daadsan maanta ma macaana in gabyaaga la tartansiinyo. Maya, kolka aynnu maansada Hadraawi sidaa ku qiimaynaynno cid la tartansiin maynno, wax se aynnu u ga aragti qaadanaynnaa suugaanta soomaaliyeed guud ahaanteed. Abuurta bani aadanka ayayna ka mid tahay, oo la ma dayn karo, in wax la qiimeeyo, wax walbana la meeleyyo.

Ku dhiirrashada go'aankaa kor ku xusan wax aynnu ku salaynnay qiimaynta saddex ammuurood oo ay tahay in qof walba maansadiisa la gu eego. Ta kowaad waa murtida iyo falsafadda baaxadda leh iyo garashada fog ee ku jirta maansada Hadraawi. Ta labaad waa hibada halabuur iyo tayada sare ee dhisme ahaan maansadiisu lee dahay. Ta saddexaadna waa tirada badan ee maansadiisa, iyada oo ay hubaal tahay in aanu jirin soomaali kale oo tiriay intaas oo tixood oo weliba badankoodu yihiin kuwa maansada soomaalida u gu dhaadheer.

Xaqiqadada haddii aynnu ka gudubno, waxaa jira fac uu ninkani ka tirsanaa oo uu gundhingga fikirka oo dhan la wadaago. Facaasi wax uu lahaa laba duruufood oo gooni ka dhigay, kana duway kii isaga ka horreeyay iyo kan maanta kacay labadaba. Duruufta kowaad waa in facani hanaqaaday marxaladdii soomaalinimada cusub iyo dawladnimada. Ta labaadna waa is la soomaalinnimada iyo

dawladnimada oo facani eeday, taas oo halabuurkiisa saamayn aad u weyn ku yeelatay.

Faca Hadraawi wax uu la kacaamay soomaalida cusub ee he-shay tacliinta, waddaniyadda, dawladaynta iyo magaaloo-bidda. Sidaa darteed aad buu u ga fikir iyo dhaqan duwanaa dadkii ka horreeyay. Kolka la soo dhaafo aab-bayaashii tacliinta, firfircoonda u gu qими badan ee cusboonaynta soomaalida facan baa lahaa. Dhanka kalena raggaasi waa is la kii ku guuldarraystay ilbaxnimadii iyo soomaalinnimadii cusbaa in uu burbur ka badbaadiyo. Labadaa arrimood ayay taariikhdu ku xusuusan doontaa: hoggaaminta soomaalinnimada cusub iyo haddana duminteeda. Nimankaa in la ka la qaadqaado oo arrinta labadeeda dhinac masuuliyaddeeda loo qaybiyaa waa masalo kale oo aan halkan macno ku lahayn.

Iyada oo ay guud ahaan sidaa ahayd, Hadraawi intii uu noolaa, sida rag kale, wax uu isaga gudbay saddex marx-aladood oo waaweyn, saddexdaas oo mid waliba si cad u ga muuqato halabuurkiisa. Ta hore waa tii soomaalinnimada iyo cusboonaynta fikirka iyo dhaqanka. In uu miyi ku garaadsaday haddana reer Cadmeed noqday wax ay mac-naynaysaa in uu afka iyo dhaqanka naftiisa meel weyn ka dejijo. Waana arrin la is la yaqaan in qofka halabuurka lihi kolka uu dalkiisa ka maqan yahay hilawga iyo dalt-abayadu jeclaysiyyaan cidda uu yahay iyo dhaqankii uu ku garaadsaday, dabadeed uu godlado. Dhanka kalena Cadan oo waagaa ahayd magaalo ay ilbaxnimo weyni taallay in uu wax ku bartay garaadkiisa ayay furfurtay oo wixiisi wax kale u gu dartay.

Hadraawi isaga oo duruufahaas lahaa ayuu ku hanaqaaday soomaalinnimada cusub iyo cusboonaynta bulsheed ee ay raggii isaga ka waaweynaa dabkeeda shideen. Taa waxaa u dheerayd baraaruggii iyo baaqyadii qaaradeed ee Pan Africanism iyo kii la midka ahaa ee Pan Arabism ama loo yaqaanno "Naasiri". Ta dambe wax uu la qabay soomaalidii badnayd ee waagaa reer Cadmeedka ahayd oo ay carabnimadu ku ladhnyad. Sidaa darteed isaga oo ay niyadsami iyo han soomaalinnimo ka buuxaan ayuu ka mid noqday maayaddii Cadan ka soo rogmatay xilligii baraka-weyn ee loo yaqaanno "Xabbadi Keentay" sannadkii 1967. Niyadsamidaa aynnu sheegnay wax ay ka muuqataa Hadraawi tixihii maansadiisa u gu horreeyay markii uu dalka yimid.. Halabuurkiisa xilligaa, iyo ilaa horraantii 1970-nadii, wax aynnu ka arkaynnaa waddaniyad ama jacayl, labadaas arrimood oo ah astaamaha hanka iyo fayoobida nafsiyadeed.

Marxaladda labaad ee waayaha faca Hadraawi waa tii qala-

laasaha siyaasadeed, kolkaas oo cusboonayntii fikir-bul-sheed ee facaas iyo kelitalisnimadii qabyaaladeed ee Maxamed Siyaad Barre xoog isu hirdiyeen. Waxaa xigtay colaaddii ka dhex dhacday garashadii cusboonaynta iyo tii askarta. Halkaa waxaa ku khasaaroobay halabuur iyo tamar ummadeed oo aad iyo aad u baaxad weyn. Gaar ahaan Hadraawi oo kacdoonkaa hormuud ka ahaa beryahaas oo dhan (1973 - 1990) maansadiisu wax kale oo ay ka hadashay waa dhif iyo naadir.

Marxaladda saddexaad ee faca Hadraawi waa dhicistii maamulkii askarta, iyo haddana burburki dawladnimada iyo ka la daadashadii bulshada. Maalintaa ka dib facan halabuurkiisu wax uu noqday calaacal iyo qoomammo. Waxaa u caddaatay halgankii dheeraa ee cusboonaynta soomaalida, iyo mar kale ka xoroobiddii awoddha askarta, labadiiba natijadoodu in ay noqotay waxba. Shacbi gaajaysan oo is cunaya, magaalooyin dambaska noqday, iyo dawlad la'aan ayuu facani isa soo dhex taagay. Dabadeed qaadanwaa baa ku dhacay. Halkaas bay calo-oxumada iyo qoomammadu ka dhasheen. Laakiin maxaa la ga calool xumaaday ee la ga qoomammooday? Ma in la da-reemay jidkii halganka xoraynta loo maray in uu ahaa mid aan qummanayn? Ma in dadaalkii cusbaanayntu noqday khasaare? Ma in la mooday umadda loo halgamayay in ay ahayd mid aan waxaas oo dhan u qalmin? Taag la'aan iyo ciilkaanbi aan soohdin lahayn baa dhammaan halabuurkii xilligaa ku habsaday. U firso dhammaan raggii maansada hormuudka ka ahaa: Hadraawi, Gaarriye, Ibraahin-Gadhle, Qaasin, Xasan-Ganey, Yamyam

Quusta iyo niyadjabka waxaa u gu darraa Hadraawi. Kolkii hore waxaaba wuu ka indho qarsaday oo Yurub buu u dhuyaalay. Ha ahaatee firxadkaasi wax uu noqday "Fallaadhi gilgilasho kaa ga ma go'do". Intii uu qurbaha joogay qoomammadii uu qabay waxaa u gu biirtay daltabyo iyo hilow, waxaana ku dhacday naf canaanasho iyo hiiftan. Dabadeed waa kii burqaday tixda fajicisada reebtay ee "Dabahuwan". Markii xigtayna waa kii dib isu sii daayay ee dalkii ku la dhex dhacay muusannaw. "War is ma ogine waa aynnu dunnaye, ina badbaadiya, oo weliba dhanka Eebbe inoo erya!" ayuu ahaa dhambaalka Hadraawi ee cusubi. Maalintaa ka dib wax alla wixii uu maanso curiyay sidaas bay ku timid, halkaas bayna ku socotaa. Manhajkaa fikir ayaa noqday sida keliya ee uu u arkay in uu bulshadiisa ku dawayn karo isaguna is ku dawayn karo. Xaalku waa "Alle la cuskay!". Taa natijadeedu wax ay noqotay ama noqon karto qiimaynteedu waa maalin kale iyo timaaddada.

Fikirka Alle la cuskay ee Hadraawi marxaladdan door

biday ha ahaado mid badbaado la ga dhex raadinayo, laakiin runtii ku ma taxna halgankii cusboonaynta ee hore. Fikirkan dambe dan badan, ama danba, ka ma laha casriyaynta iyo kacdoon gelinta ilbaxnimada soomaalida, sidii ay ahayd 50-nadii, 60-nadii iyo 70-nadii. Tani halgan ma aha ee waa arrin; talo la gu dabaqabanayo um-mad loo arkay in ay rogmanayso oo haadaantii baabba'a ku sii hoobanayso. Hankii iyo niyadsamidii hore halkan ma jiraan. Soomaalidu ha midowdo ma aha. Soomaalidu xoog ha yeelato ma aha. Soomaalidu ha ilbaxdo ma aha. Soomaalidu dunida meel wacan ha ka gasho ma aha. Waa se soomaalidu dhimasho ha ka badbaaddo. Afgaradka badbaadintuna waa qaadka oo la is ka daayo, qabyaaladda oo la ga koro, sinnaan bulsheed oo diinta ku dherersan oo la helo, iyo irisiqa la haysto oo la iimaansado, la dhawrto, lana tarmiyo. Intas oo dhan waddada la gu gaadhi karaa waa cuskashada xadhigga Eebbe, ayuu ahaa dhambaalka marxaladdan cusubi.

Masaladaa haddii maansayahannada ninba meel ka bilaabay, Hadraawi wax uu ku ibarfuray tixda Baarcaddaha ah ee "Dabahuwan", tixdaas oo nafsiyadda dadka soomaalida aad u ruxday. Hab-dhaca ama qaab dhismeedka tixdu waa xeeladda u gu waxtarsan ee dadka la gu la hadlo: in dareenka nafsiyadda tebiyaha iyo lootebiyuhu midoobaan oo is ku milmaan. "Dabahuwan" sida ay u samaysan tahay waxaa la moodaya Hadraawi in uu naftiisa uun ka hadlayo oo la hadlayo, runtu se sidaa ma aha. Iyada oo ay tiisuna meesha ku jirto, arrinku waa xaaladda nafsiyadeed iyo bulsheed ee uu u arko in dadkisu ku sugan yihin. Waana dhab oo umadda soomaalidu aad ayay u gu sifowday waxa ay tixdaasi ka hadashay sannadkii 1996.

Haa, "Dabahuwan" ayuu Hadraawi ku ballaysimay marxaladda saddexaad ee halabuurkiisa, hilinkaas ayuuna intii dambe oo dhan ku arooriyyay. Tixaha la ka la yidhaahdo "Hal iyo halkiis", "Adduunyadu waa besteed", "Awaaltiris", "Anuun baa hooyadaa ah", "Mayal dheer". "Dhulgariir", giddigood waxba ka ga ma duwana "Dabahuwan". Wax ay wada doonayaan in ay tilmaamaan sida uu soomaaligu u ga lumay toobiyihii nolosha, dabadeed kolkii uu ambaday u hoogay una ayaandarrooday. Dabcan eeddani meesha ma timaaddeen haddii la gu liibaani lahaa cusboonayntii hore.

Tixda "Adduunyadu waa besteed" sidii aynnu sheegnay waa is la "Dabahuwan" oo si kale u dhacaysa cod kale-na ku hadlaysa. Waa is la labadii masalo ee ka la ahaa sida akhlaaq ahaan loo dumay, iyo sida ay badbaadadu tahay oo loo arko in Eebbe la isu dhiibo. "Adduunyadu waa besteed" waxa ay ka ga duwan tahay "Dabahuwan" waa

iyada oo rajo hilaadinaysa. Haa, foolxumooyinka jira cid wanaajin karta ayaa nool. Bal u firso axadkan soo socda dhaqankiisa, iyo haddana saadaasha ay tixku ku dhammaanayso:

Waxaa isu soo bulladay
Bugaanbugihii wakhtiga
Bilaash-jeceshii casriga
Bulaanbuliyay tumeen
Dadkuna budulkooda raac
Siyaasina beel ku dhoof
Dantiisa ku baadidoon
Ku baaji xilkay lahayd
Sidii goray baarcaddee
Ballaadhsiga diin ka dhigay
Baxnaanada sii adkee
Hilaadaha sii burburi
Bawaarkana sii ulee
Bilaale ka qaad yaraa
Cishaba huri duur belbela
Billaawaha sii casee
Billaahida sii xasee
Buskeeda ku sii xabaal
Biliiliqo sii dhudhum
Baruurana sii fantee
Awaalaha sii basaas
Sidii buro soo noqnoqoy.

Wuxuu Boqorkeedu yidhi
Wixii Bido meel u yaal
Ilaah bixiyaa ka dhow
Bushaarana way jirtaa
Hadday falaw baaban tahay
Banaanadiyaa xaslada
Hadday bili doorsan tahay
Baftiyo qurux baa u taal
Hadday tahay biir aja ah
Caway ku ballaysan tahay
Bar-laawe hadduu didsaday
Barbaar gudan baa u nool
Hadduu baqal-fuul gurguray
Baroor faras baa hidda ah
Hadduu badhax-miis ku dhalay
Runtaan la biyayn karayn

Nin baydhsadayow dan guud
Waxaa jira baadidoon
Af booli wixii ku maqan
Col soo bedayaa ogsoon
Badraanno hadday jiraan
Barqaa la gu waayayaa

Hadday wada B.M tahay
 Buruud kiciyaa dul yaal
 Waxay bohol jiidhayaan
 Libaax bulbulaa ku jira
 In baal sidataa dahsoon
 In baabbaco laa digtoon
 Dhashii Beder baa xidhxiidhan
 Biddena camalkiis u daa.

"Anuun baa hooyadaa ah" waa hoogga qofka soomaaliyeed ee cusub ka ga dhacay hab-nololeedkii iyo habsamidi qoyska. "Mayal Dheer" wax ay ka hadlaysaa ninka soomaaliyeed ee dhaqan dumay ee aayihii noloshiisa qadka siistay sida uu u dhaxalwareegay. "Dhulgariir" waa awaalawarran, canaan bulsheed, iyo talo ku saabsan soomaalidu kolkii ay cusboonaynta ku guuldarraysatay sida ay u gu jirto xaaland ka liidata tii gabowday ee ay beri doontay in ay ka baxdo, iyo sida qaybsanaanta iyo dulmiga dhexdeeda ah cadaawuhu u ga faa'idaysan karo.

Waddadaa diinta iyo hiiftanka ah iyo la xisaabtanka nafta ayuu halabuurkeennu maanta ku taagan yahay, qabkaas ayuuna fikirkeenna xooggiisu u socdaa. Waa ta keentay codka suugaaneed ee barbaartu, jaad uu yahayba, in uu u bato waano iyo wacdi bulshada ku jeeda. Halqabsigu waa diinta, dunidu gaalo iyo muslin ayay u ka la dhambalan tahay, casriga iyo waxa uu wato oo dhanna waa la hiifayaa. Astaamahaa kor ku xusan ayaynnu ku garan doonnaa fikirka marxaladdan saddexaad ee Hadraawi horseday.

Tamashle

Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"

Kulaylka qorraxda ayuu ka hadhsaday oo goor duhur iyo casar u dhexeysa sariirta dhabarka u gu jiifaa. Qol uu keli ku yahay ayuu saqafka indhaha ku hayaa. Diillimo yaryar oo saqafka ka muuqda ayay eegmadiisu ogaan la'aan u raacraacdya, fekerka iyo xusuusta uu ku maqan yahay ayuuna sii macaansaday. In kasta oo aanay hurdo badani hayn in uu kulaylka ka yara seexdo ayuu doonayay. Laakiin gabadha uu berri u ardaadhigayo arrinkeeda ayaa markiiba ku soo dhacay iyo sida hawli noqon doonto. Waa tu yar oo wacan oo ay go'aan adag is la meel dhigeen, xaggeedana ka ma welwel qabo, laakiin xilka ku soo socda sida uu u maamuli lahaa ayay maalmahan oo dhan maskaxdisu dayn la dahay.

Hawsha guurka ayuu fekerku ku soo galay, laakiin imika xusuuso iyo filashooyin is ku wada raran oo aanu u tooghayn baa ku soo furmay, dabadeed wuu is ka sii jeclaystay. Mar uu fekerkiisa jiciirtay ku baraarugay wuu la yaabay sida ay maskaxdu maalinba meel aanu filayn u gu hayaamiso. Cajiib! Alla maskaxdu tan badanaa! ayuu la yaabay. Riyooyinkii xalay buu la fajacsanaa iyo sidii ay run u gu ekaayeen, iyo dhulkii ay geeyeen, iyo meesha imika loo daaddihiay. Alla maskaxdu qaad weynaa! ayuu is yidhi. Mar kale ayuu mala'awaalkii macaanaa la tegay oo samada u la baxay. Saqafkii buu dhex galay oo ku libdhay. Wuu ogaa in uu sii socdo oo xiskiisu dhalanteed ku sii lumayo, laakiin wuu isa soo qaban kari waayay, naftiisa ayaa doonaysay oo wuu sii jeclaystay ilaa uu lumay oo is waayay.

Imika waa soddon jir Burco ka ga shaqaysta farsamada baabuurtta, laakiin yaraantii reer miyi buu ahaa. Miyiga in uu ku noolaado oo xoolo dhaqdo oo degaanka dabiiciga ah dhex joogo ayuu ka jeclaa Burco, duruufaha nolosha ayaa se magaalada qiiqa iyo siigada iyo qaylada badan ku dabray. Qiiqa iyo siigada iyo qaylada iyo qorraxda ayuu imikana ka soo dhuuntay marka uu sariirta dhabarka u jiifo ee saqafka eegayo ee khayaaligiisu faraha ka baxay. Degaan miyi iyo xoolo iyo duni dhan buu daawanayaa.

Isaga oo aad u niyad wacan ayuu tegay miyiga oo roobban oo barwaaqo ah oo xooluhu dhaleen. Wax waliba waa ay wacan yihiin oo qurux badan yihiin. Wax waliba. Wax uu dareemayaan gobannimo iyo weynaan iyo sarrayn iyo jacayl iyo raynrayn. Waa barqo aan kululayn oo qorraxdu daruuraha roobban ku dhuumaalaysanayso. Dhulku uumi udgoon oo rays ah buu neefsanayaa. Roobabkii kuga ayaa ciidda jilciyay, xalayna gudgude weyn baa arlada miray oo kolka cagtu dhulka ku dhacdo wuu diismayaa oo dayaan baa ka yeedhaya. Waa ay aad u dhir badan oo caleentu dabooshay. Geed waliba bilicda abuurtiisa u gu sarraysa ayuu ku dhaatay, wax uuna soo bandhigay caleen, ubax, midho iyo laamo curdin ah. Geed waliba barwaaqada ayuu ka hodmay, dabadeed noolaha martiya deeqsinnimo ku sooray. Nolosha waa ay is buuxisay oo waxba ma dhinna, wax walibana waa raallli. Kaynta hawrtay ayuu keligi dhex marayaa. Ma degdegsana oo dan ka baylahaysaa ma jirto. Waa tamashle. Wax uu qabaa wanaag nafsadeed oo aad u weyn.

Dharabka dhirta ka tifqaya ayaa jabaqda xoojinaya oo meel durugsan baa wax la ga

maqlayaa. Noolaha ayda ka buuxa inta ishu qabanayso waxaa ka badan inta dhawaaqeeda la maqlayo. Wax uu maqlayaa cida xoolaha. Baarqab baa mar guuxaya, mar doobta ka ga daryaaminaya, mar kalena micilisanaya. Geel baa ololaya marna reemaya, oo nirgo ayaa yuusaya marna dunuunucaya. Ri baa ciyaysa, orgi baa qalaadaya oo qaloonbiyaya. Ido iyo naylo ayaa isu ciyaya. Lo baa araasiyaysa oo bannaaxiyaysa. Fardo ayaa dananya. Sawaxanka shimbiraha ayaa isu baxaya; shimbiro isu yeedhaya, isu heesaya oo isu jiibinaya. Koor geel baa baxaysa, boodaan iyo aleenba. Wax uu maqlayaa dhawaaqyada kurayada iyo foodleyda xoolaha la jooga ee bardoodamaya. Yeedhooda iyo hadalkooda iyo oohintooda iyo qosolkoodaba wuu maqlayaa. Foodhida xoolaha la gu wado ayuu maqlayaa. Foodhi-gaallada ay wiilashu is ku maaweeulinayaanna wuu maqlayaa. Waxaas oo cod iyo intas oo dhawaaqba wuu maqlayaa.

Isaga oo liibaantaa dhex tamashleynaya ayuu baabuur guux weyn oo soo ag maray ka ga nixiyay. Mise wallahay qolkii yaraa buu jiifaa oo saqafka cad liidadka yaryar daawanayaa! Oo wixii oo dhami ma dhalanteed bay ahaayeen? Cajiib! Alla maskaxdu qaad weynaa! ayuu mar kale is yidhi. Ilbidhiqsigli kaa xigay ayuu khayaaligiisu mar kale dib u cararay.

Ayda barwaqaqaysan ee uu dhex jiidhayo laamaha curubta iyo caleenta xooluhu goosteen, ubaxa ka la jaadka ah iyo xabagta roobku qooyay waxaa ka soo kakamaysa ur ka la duwan oo sinka u loollamaysa. Ilbidhiqsigli walba wax uu dareemayaa maqal, muuqaal iyo ur cusub oo gooni ah. Bal eeg labadaa sagaaro ee isa sii daba gaatamaya, ayay naftiisu tidhi, waa yac iyo atoor. Bal eeg cawshaa gubadka yar daaqaysa, dhawr jucuur oo geeso waaweyn baa ku dhex jira. Bal eeg saddexdaa dabataagood iyo liigga. Wacanaan lahaydee inaad aragto deero siig la socdo, iyo garanuug. Waad soo aragtay gorayoo-yin ugxn dhigtay oo haldhaayo iyo gorayacawlo isu gu jira. Goodir waad aragtay oo xitaa markii aad dhaafaysay kaa ma uu didin, laakiin biciid ma aad arag, raadkiisa rayska maray ayaad se aragtay. Ugaadha degaankan ku nooli inta jaad ee ay tahay matirin kartaa? ayuu is wayddiyay. Haa, haddii aad u soo jeesato waad tirin kartaa. Ugaadha, dugaagga iyo dhirtaba waad tirin kartaa, laakiin cayayaanka Ilaahay uun baa tirin kara.

Midho curdin ah ayuu geed hohob ah ka goostay. Jinaw si wacan u baxay ayuu dhawr caleemood oo dharabku tifqayo ka goostay, dhanaan uu u baahnaa ayaana qanjaha roray. Marooro duur ku soohan buu ka furfurtay, dhanaan macaan ayayna lahayd. Carrabro'aad rayska ka qotoma oo dhudhun dherer la'eg buu arkay oo daawsho ku dhaafay. Xamankow curdin ah oo geed xoday ah hoostiisa rayska wadhan buu arkay, sida quruxda badan ee uu faraqyada u bixiyay ayuuna daawaday, dabadeed far buu ka goostay. Sarmaan-jiif weyn oo sida dallaayadda isu fidisay oo ubax cad oo udgooni qariyay oo duulaagu ku damaashaadayo ayuu ubax ka goostay oo udgoonkiisa ursaday. Sarmaanta hoosteeda ee ciidda cas ee rayska ah ee aan cawska lahayn ayuu eegmada geliyay, wax uuna arkay dhawr like oo qaarkood soo fuureen qaarkoodna debedda yimiddeen. Timayuluq iyaduna soo fuurtayna wuu arkay. Rayska sarmaanta hoosteeda ahi aad buu u udgoonaa una qaboobaa, in uu yara fadhiisto ayuuna ka fekeray, laakiin ma uu daallanayn. Wax uu doonayaa maanta oo dhan in uu aydan is ka sii dhex socdo oo aanu ka bixin.

Mar kale maqalkiisa waxaa dhabqiyay niman aad u qaylqaylinaya oo daaqaddiisa hoos maraya. Illayn weli saqafkii buu daawanayaa! Dhinac buu isu rogay isaga oo doonaya in uu yara seexdo oo dhalanteedka maskaxda ka saaro, mar kale ayuuna sii yara eegay hawsha guurkiisa. Laakiin imikana derbiga sariirta ku dhinac yaalla ayay indhihiisu qabteen. Qudhaanjo yar oo maraysa ayuu isha la raacay, sidii uu u eegayay ayna wax

kale u la ekaatay. Waa gaadhi waddo ku taagan. Maya, waa dameer dhaaminaya. Ama waa hal oo aroor ah. Sac xitaa waa ay u eg tahay, iyo xitaa lax, ama ri. Haddana wuu la yaabay sida ay maskaxdiisu qudhaanjadan wax kale u ga dhigtay. Maxaa qudhaanjada u ekaysiyyay gadhi iyo xolo?! Cajiib! Taas buu ka fekerayay, mooyi se goor uu haddana kayntii hore ku noqday.

Maskaxdiisa waxaa ku soo dhacday dhirta uu dhex socdo tiradeedu inta ay ahaan kartto, in uu tiriyo ayuuna ka fekeray. Fikrad liidata ayay la noqotay, haddana wax uu bilaabay in uu tiriyo. Lebi, yucub, raydab, qudhac, maygaag, bisiq, qararro, xagar, xoday, xagarmadow, gawllallo, dhammaajo, qadhoon, dhuundhas, cadaad, bilcil, jaleef-an, qansax, gumar... sabansabdho, himir, dhuyac, dhafaruur... wax uu is arkay isaga oo tirinta dhirta ku shuqlan. Haddana wax uu ka fekeray geed walba abuurtiisa waxa uu ka yaqaanno. Xodaygu in uu lee yahay dheecaan caano u eg oo marka la turqo ka soo burqada in yar ka dibna xabag noqda ayaa maskaxdiisa ku soo dhacday. Alla xodaygu qadhaadha! ayuu xusuustay. Taa beddelkeeda xagarmadowgu in uu lee yahay dheecaan aan midab iyo dhadhan lahayn oo qunyar u soo baxa, hadhowna noqda xanjo la raamsado iyo foox udgoon oo la shito ayuu og yahay. Haa, dharkaynka isagana waxaa ka soo burqada dheecaan caano u eg oo haddii ay jidhkaaga taabtaan ku guba oo aad muudhmuudho.

Si kediso ah wax uu u gu soo baxay xeryagaallo waaweyn oo cidla ah oo saaka geelal ka dareereen. Xeryihii buu dhex galay. Ardaagii buu istaagay; ardaa aad u weyn oo oodo iyo caws la gu dugsiyay, dureemana aad loo gu goglax oo xerayaha ka dhex samaysan. Dabkii saaka la shitay oo dambas daboolay weli wuu sii nool yahay. Ardaaga muskiisa ayuu egeegay. Haa, gaawayaaal caano ah oo xarfanaya oo yacayga ardaaga ku xasaysan buu arkay. Mid buu la soo baxay oo inta uu gogoshii dureemada ahayd la fadhiistay labada dhaban qabsaday. Caano lis ah oo qaboobay oo macaan oo udgoon oo la garan-ayo in geel dhalay la ga lisay ayay ahaayeen. Kolkii uu dhamay ee ka dhergay ayuu meeshii ku celiyay, cawskii awal ku daboolnaana si wacan u gu deday. Ma uu dareemin caanaha in uu xaday, waayo wuu hubay raggii meesha dhigay in ay ku farxi lahaayeen cid u baahani in ay dhantay. Socodkiisii ayuu sii watay.

Sidii uu u socday dhulkii waxaa ku dhacay isbeddel uu dareemay. Haa, hoobasho ayuu dhulku yeeshay uu dareemay in uu hore u hantaaqoonayo. Damal badan oo teedsan ayay haddana hortiisa indhuhu qabteen. Intii aanu feker haleelin ayay sankiisa soo gaad-hay ur gooni ah. Ilbidhiqsigli xigayna il bannaan buu u soo baxay. Haa, waa balli weyn oo biyuhu galac lee yihiin. Biyihii oo qaboobaa ayuu cabbay, dabadeed madaxa iyo gacmaha iyo lugaha ku maydhay. Biyaha sida deggan u jiifa, ee hareeraha garagaradu ka lingaxday, damasha waaweynina hadoodishay, ayda barwaqaqada ahina ku meegaaran tahay ayuu baraadli'i u daawaday. Meel ka qurux badani in aanay dunida jirin buu naftiisa u gu dhaartay. Cid uu jecel yahay in ay la joogto oo la daawato ayuu jeclaystay. Il-bidhiqsigaa ayuu dhabarkiisa jaqaf ka maqlay, mise waa Xiis, tii uu berri u fadhiisan lahaa! Farxaddii buu hambaraberay. Sariirtii buu dhanka kale isu gu rogay. Cajiib! Alla maskaxdu qaad weynaa, ayuu la sii yaabay.

Isaga oo adduunkaa ku jira ayuu ogaaday in ay goor dambe noqotay qorraxdiina qabow-day, dabadeed inta uu kacay ayuu dharkii shaqada gashaday. Dharka shaqadu aad buu u uskag badnaa oo saliid iyo habaas baa isu gu dhegay, siifadda ka soo uraysa ayaana ka daran. Geerashkiisi boodhka weynaa kolkii uu mar kale ka shaqo galay sawirradii quruxda badnaa ayaa maskaxdiisa ka buuxay. Malaha iyaga ayuu dheefsanayay oo foolxumada geerashka u gu adkaysanayay. Kollay xusuusta Xiis wuu dheefsanayay oo foolxumada geerashka u gu dulqaadanayay.

SADDEX GOOR XAQ MUDAN

Xasan Daahir Ismaaciil “Weedhsame”

Ninka soomaaliyeed hidde ahaan wax uu lahaa qofnimo aad u qallafsan aadna u arxan daran, duruufaha nolosha iyo degaanka oo adkaa ayaana sidaa ka dhigay. Taasi wax ay keentay in debecsanaanta, qoboobaanta iyo naxariista loo arko jileec, nugayl iyo liidnimo. Kakanaanta ninka soomaaliyeed wax ay aad u ga muuqataa suugaanta oo ah waxa ka turjuma dareennada u gu hooseeya ee dadka. Maansada soomaalidii hore aad ayay u yar tahay inta muujinaysa jacaylka, naxariista iyo guud ahaan macaanka nolosha.

Qofnimada sidaas u adadag ayuu ninka soomaaliyeed nolosha oo dhan la galay. Tusaale ahaan xidhiidka qoyska (marwo, waalid, walaal iyo ubad intaba) ninku wax uu u la dhaqmi jiray si qallafsan, oo aanu marnaba jacaylkisa muujin. Qaabkaas ayuu u arkayay in ay tahay in loo dhaqmo si aanay noloshu u jilcin oo u jabin. Sababtaas ayay maansada raggii hore aad u gu yar tahay tix nin hooyadii ku ammaanayo, ama aabbihi amma walaalladii ama ooridiisa amma ubadkiisa. Koolkoolinta ayuu diiddan yahay oo u arkaa dacifimo. Kolka uu xubnaha qoyskiisa tilmaamayo wax uu odhan jiray “odayga iyo islaanta i dhalay”, “kuwa aannu walaalaha nahay”, “ta ii dhaxday, yaryarka hooyadood, ta aannu wada joogno iwm”, “kuwa aan dhalay”.

Haddaba is la xilligii ay dhaqankeenna soo gashay ninku in uu jacaylkisa ka maansodo, oo weliba u rogo fan iyo suugaan bulsheed, ayay bilaabatay xidhiidka gacal-tooyo ee qoysku in uu is muujiyo oo afka la ga sheego. Tusaalayaal badan ayaynnu soo helaynnaa sidii ay arrintani bulshada u ga dhix abuurantay ee u faaftay. Haddaba hooyada oo ah ruux mudan xurmada iyo jacaylka u gu badan ayuu ninkii soomaaliyeed ee qallafsanaa u debcay oo bilaabay in uu dhabteeda ka ooyo. Taa sababteeda dad baa moodi kara diinta oo aan hore loo aqoon oo dhowaan la bartay, laakiin dintu waxa ay hooyada ka tidhi qof muslin ahi weligiiba wuu yaqannay. Isbeddelka waxa keenay taa ma aha ee waa furfurnaantii iyo cusboonaantii dhaqanka soo galay.

Maansooinka badan ee xurmada iyo jacaylka hooyada la ga tiriyay maanta aad bay u badan yihiin, idilkoodna waa wax la curiyay intii ay cusboonaantu bilaabatay. Laba heesood oo isu xilli dhowaa, kuna beegnaa badhtamihii 1970-nadii, oo ay ka la tiriyeen Maxamed Ibraahin Warsame “Hadraawi” iyo Carays Ciise Kaarshe, ayaa meesha u gu sarraysa ka galay maansada maamuusidda hooyada. Dabadeedna dhaqan ayay noqotay.

Heesta halkan ku qoran oo tubtaa ku arooraysa waxa

tiriay Xasan Daahir Ismaaciil oo la gu naanayso “Weedhsame”.

Mana gudan xilkaagii
Mana gabin xqaagii
Xasuustana ma moogiye
Xujadaada weyn baan
Xag aan ka ga hagaagiyo
Xeeligeegii laayahay!

Saddex-goor-xaq-mudaney
Xinjirtayda dhiiggaay
Xaramkii labaadey
Xaaska haybaddisaay
Xag alliyo dhankaagay
Qudhu igaga xidhantee
La'aantaa xayaatada
Xabaal baan ka gali laa.

Xadhkihi sammaantiyo
Heeryadii xaqiqada
Xajisee adkaysaay
Qof xannaanadaadiyo
Xiisahaaga waayaa
Xagaldaac ka bixi waa
Xiskiisuna ma buuksam.

Xayndaabka guushaay
Xaruntii aqoontaay
Halabuur xuruuftiyo
Xarakeeyo maansada
Adigaa xanjaadkiyo
Hooyo xaynka ku af bara
Deeqsi xoolo badan oo
Xaasidnimo ka saahiday
Adaa xeerka soo bara.

Hablo xuural-cayniyo
Xariir guudka loo dabay
Xulantida la tiigsado
Adaa xoor ku soo horay
U sii xaadhay daw siman
Misna faray xuduuddiyo
Inta la ga xishoodiyo
Inta aan xajiin iyo
Xumo la gu ogaynee
Garashadu u xilatee
Xusulduubka raadcada
Xergi loo gu baratamo.

Markuu xoolka jiifyo
Markuu xoogga lee yahay
Xildhibaanka uunkani
La'aantaa xal-keenaa
Xero oodi kari waa.

Xarumaha caloosheed
Hooyo i gu xammaashiyo
Xanaf iyo kulayl iyo
Xanuun fooshu lee diyo
Qaydkiyo xansheerkaad
Wallee i gu xambaartiyo
Xaqii naaska maba gudo.

Xiskaygaad ku milantoo
Xididda halbwalaha
Xinjiraha u qaadiyo
Xubnahayga oo dhami
Xaqa aad ka mudantay
Ku xadraynayaanoo
In ta xay aad tahay baan
Xurmayntaada qaanta ah
Xirib qudha qiyas le'eg
Xilbax in aan ku soo gudo
Ku xisaabtamaayoo
Haddaan xoog u lee yoon
Xayiraaya dhiillada
Xanuun iyo bukaan iyo
Xummad maba ad aragteen
Anigaa xawilan laa
Dhibta kuu xammili laa.

Xushmayntaada ruux gabay
Xaqdhawrkaaga baal maray
Ma xasilo adduunyada
Xawdkii rasuulkiyo
Janno waa ka xaaraan.

Qof xeerkaaga sheeg yidhi
Xuduuddiisa gaadh yidhi
Ku xabeebay mooyee
Xusul qudha dhammayn waa
Anna xarafka maansada
Nabarrada xanuunka leh
Ku xadhaadhi mooyiye
Xaasha'e ismaan odhan
Xaqa hooyo lee dahay
Carrab baa xaddidi kara.

Xudduntaan ka beermaay
Xujadii adduunkaay

Xogogaalka dhaqankaay
Xildhibaanka noloshaay
In ta xidid ku nool yahay
Xagtintiyo dhibaatada
Xayndaab biroo adag
Xijaab aan la mari karin
Kaa ga xeerryay Mawlulu
Rabbigay xabaashana
Xaraarahaa Fardawsaad
Xadin kaaga poondee

Anna xiise duugiyo
Dareen xaaluf-diidiyo
Xadantiyo kal kuu xalan
Waa mid aan la xadi karin.

Xeedhada aduunkaa
Xawd i gu sabaysoo
Xamashkiyo ugbaadkii
Cidhifyada ku xidhatee
Xajka kaama baajeen!

Maanso “Miski”

Rashiid Sheekh Cabdillaahi

Maansada “Miski” waa saddex qaybood. Qaybi waxa ay ka hadlaysaa, innagu gobannimada waynu dooni naqananaa, haddii ay galbatana waynu keeni naqaanna; laakiin ma xannaanayn naqaanno, waddaninnimaduna way i nagu yar tahay; waxana i nagu yara badan danaysiga. Haddii umaddu danaysi uun ku dhaqaaqdana, dhalinyaroy idiinkaa u da’ yar, idinka ayaa gobannimadan aayaheeda, macaankeeda iyo nolosheeda u yaryare, annagu waannu gabownay. Haddii danta gaar ah loo cararo, waxa lumaysa wixii i naga dhaxaysay oo dan guud ah, oo sharcigii ah, oo dhaqankii wanaagsanaa ah, oo midnimadii ah, oo rag iyo dumar ah, oo qof weyn iyo qof yar ah. Intaasi hadday i naga luntana, dan gaar ah cid haysanaysaa ma jirto. Mar taas ayay ka hadlaysaa oo anaa naftayda leh: “Waxaa imika taagan ha ku milmin ee waxaad qabasataa dariiqii Rasulku maray CSW.” Markaasay nebi-ammaan noqonaysaa. Haddana, aakhiro ayay i na yara tusaysaa. Laakiin waxaan yara iftiiminayaa in yar oo suugaanta ah meelo yaryar. waxaynu had iyo gooraale ammaanta u qaadan jirnay habalaha, gaar ahaan marka la ammaanayo, dayaxa, cadceedda, Daalo, ubaxa, geel dhalay, xareedda iyo waxyaabo kale. Imika waxa hablihii i noo matalaya midabbo badan oo daruuro ah; way shirayaan; waxay macsumayaan dayaxa. Dayaxuna waa wiil, waana guurmeer. Shir bay u samaynayaan, xaflad, wuu imanaya, wuu gacan qaadayaa; markaa waxa uu ugu mahad naqayaa nuurkii; waana guurmeero wuu eegayaa iyo gooraale.

Way isqurxinaysaa, bootar baa hor yaalla; cedar bay haysataa; saasay haysaa; sidaasay gurasaa. Show ninkan dayaxuna waa badow oo waa baadiye fowqal baadiye oo dookhiisu madowga cabbaadhyaha leh, iyo maarriind-halaalka iyo masciideedka iyo midabka casar-jabiska ah iyo casaansoomaaligeennii xaadda lahaa, show ninkuba intaasuu ka helaa. Xaggaas ayuu ka bilaabay. Mar alle markay aragtay in xaggaa laga bilaabay ayaa garabkeedii laga kacay, intay “uhu” tidhi bay afka xaggaa u jeedisay. Tii oo is cabbudhinaysa oo cidiyahaasina naftii ka baxday, ayuu yidhi, “Haye dhiin,” oo ay tidhi “Haja, haja, ha ii sheegin.” Iska sasabayay. Dayaxa dabeeto mushkuladdii, waxa uu qaadanayaa casaankii xaadda lahaa oo inta midab jira oo dhami ku sharrahan yahay oo mardhacyo leh. Wuu ku soo boodayaa; waa la is gacan qaadayaa. Waa la heshiinayaa. Laakiin xaggaa culimo ma joogto oo wax u meherinaya ma hayo; dhulkana ma iman karaan, macsina ma yaqaannaan; haddana muraadkoodii bay helayaan. Waxa u minxiis ah ururka oo wiil ah; waxa u shaqaynaya oo guriga ka shaqaynaya, Gaafka ka shaqaynaya xiddigaha oo hablo ah. Laba mahiigaan ayaa u dabbaal degaya; onkodku waa inan oo arooska waa laga heesayaay oo kamankuu tumayaa oo waa mudrib. Saddexda xadhig ba waa uu isla helaya. Adigu ninku macsum buu gelaya. Dayaxa laba uun baa ka adag; inay cadceedi ku soo baxdo iyo inuu madoobaado. Labadaba wuu ka nabad gelaya. Haddaba waa tan “Miski.”

Bulshadaan muddo dheer u macallin ahaa
Maansheeyey sidii mahiigaan
Rag maali og baa markaa u cushoo
Miciinkeeda maandhow way necebtoo
Cashuurba mudduu u miisaayoo
Waa kii maskaxdiisa maal siyyoo
Maahmaah ka sameeyey mahadho ahoo
Cabdi baa ku matalay miroodka lo’dee
Hadduu maqalkii musbaar kaga jiro
Milgahaa calankiyo midnimada ba
Haddaanay u muuqan maaree.
Qabyaalad masayrtay haw muhatee
Waa kaa muruqodi maadh ka qadshoo
Minjiyo madax toona garan maynoo

Maroodi u maydhi kari maynee
Mur iyo dacar mowjadaha lidiqa ah
Mabda’aa lagu jabay mashruuca xilka leh
Ruuxii ku milmaa xumaan martiyee
Ha moodin in uu macaash ku jirro
Intoon dhiig ka miirto maatida
Maryahaan ku tukado marmarin maayee

Jidiinka madow nafyahay ka maqline
Waa taa mustaqiimkii laga maarmoo
Xaaraan maqdaca mubaax noqotoo
Masuul la dirtoo miskiinka dulmiya
Magaratada maalki baa hodayoo
Musuq bay ka dhisteen mandaradaha oo
Madluunna macbuudku waa ogyahee
Iimaan madhan baa musiibo ahoo
Muskiyo ma arkaan maraa qodax loo
Meydkyo ma tebaan marxuunka dhintoo
Kuwii mamay baa hadhaw mergadoo
Laf meel xun istaagtay baa makashoo
Mawdkii dili laa maqnaan maayee
Mar baa iman doonta uu mudayoo
Ifka ba maararrowgu waa maalmee

Marinka ha ka tegin la mahadinayoo
Jannadaa malab iyo macaan badan lehe
Maalintay darantee miciinka dhabta ah
Mursalka Alle doort ay oo Muxamad ah
In aan madashaas maciisa noqdoon
Xawdkiisa maggaabsho ka ma maarmee
Macnaha fahanoo nafyahay maqaloo
Mursalkuu rabbi keenay mowliid
Miski baa ifka yimid markii uu dhashoo
Dhirtii muruxdaa magooool bixisoo
Muslinkii maqlay baa muraaqoodoo
Gaaladaa murug iyo madluun ku dhacoo
Anigu ma oggoli maqaarsaaree
Manidii laga tuujay Maxamuudiyo
Marwadii Faadumaan maceeda ahoo
Midhihi Cali baan illeyn ka midoo
Awowgay mudanaa ammaan mulkiyee
Milayguu di’i jiray raxmaadka maraa
Miray uu garamaale mayracayoo
Maal uu cuskadiyo midhaaf ku da’oo
Xareedu moqorkii haraa mallidoo
Maadhiyo dixidii mugged u baxdoo
Man uunsaday ubax majeeranayoo
Sidii Maacaleesh ku maanqaadiyo
Himirtoo malabliyo midhcaantii

Midhaa dhebigiyo madheedhki oo
Hoobaantu masowday madaxii
Magoolka dhirtiyo cagaar mudmudoo
Aan maal cunin meeris kolay tahay
Miyiga soke iyo magaalada
Malkada qaybisiyo madaha labadaa
Cirkoo muddo iyo dharaaro maqnaa
Mayeygoo curtay maalin iideedoo
Muunidiina ka qaaday maansha Alloo
Dadkii masallaha mushaaxaayoo
Xariirtii Makiyo maryii la xidhoo
Muslinkii tukiyeen musheekhdiiyoo
Fooruhu ku masruufo milicsiga
Shan kastoy marsadaan malyuun cadarro ah
Intaasu madad iyo marqaan malahee
Waxaan marag iyo markhaati ka ahay

Macbuudkaa ka sameeyey maawaradoo
Udgoon aan maydhmin Maxamed baa helay.

Magaanku ma gaadho maal la dhacee
Manaayaha maydalkaa xarbiyoo
Miidaanka halista ah mucduu u galiyo
Geesiga miiggan baa dhufayska mutee
Maalkay kor u qaadday maayadi
Rag baa dhemuquurta mowjadahee
Anigu meel sokaan iskaga maydhane
Elleen ma aqaa murtida la tirshoo
Shaytayda midh waan mutuhinaayee
Maansada aan luggooyo miimka ah.

Maqrubkoo galay maalin dabadeed;
Isagoo ka mulkiyey maqaamkii
U muruxsaday miiladiisii
Dayaxoo soddon midab macsuumeen oo
Daruuro malaasan meegaaroo
Caddaan u muquurtay maariinoo
Maydhaan ku sameeyey muuqiyyoo
Miskeed yidhi sagal macaan badanoo
Mareego ku yeeshay madaxiyyoo
Miliilicay maydal qoor dheeroo
Cagaar magansaday mucda u galayoo
Maamuusay madow qardhaaso lehoo
Ximir aan iska maydhin caad maray iyo
Mataano yihiin masciideedoo
Maalay iyo xaydh mullaaxsadayoo
Maslaxanaaya dhiin masayr galayoo

Mukhayntii ka yeeshay maansha Alloo
Cawlaan la madaystay xoosh makaloo
Muquunshay intaanu moos odhanoo
Mudkiyo isku loohsay maydhaqa oo
Ka milicsaday meel agtiisa ah iyo
Sugul uu majeertay mee yidhi oo
Casuuus ka maqnayd u muhanaayoo

Meehaahay intuu ku maax-dumayoo
Jeegaan isku maray macawiso leh.
Intaas oo midab oo malkada degay
Dayaxoo maris dhebay u muuso qoslooo
Mkidhaafay dhedhodaad madashaas oo
Salaanta ku maalay midgitiisoo
Leebabkoo mudacyiyo maxaadho sidiyo
Madagtuu ku dhejiyo qodxii ku mudoo
Mihiimsiiyey nuurkii oo Milan oo
Marriimay midduu ka caashaqay oo
Murriyad iyo sudhay makaawiba oo
Casaan mardhacyo leh marta u furatoo
Intay marxabbaysay maamuustoo
Isagoon mufti iyo wadaad u meherin
Macrina aan samaynин muran li'i
Mafsuuday intuu muraadsaday oo
Halkaa madaddaalo mush noqotoo
Ururku u malxiisay maalmo yar oo
Mashxarad xiddiguu madiixeen oo
Mahiigaan hillaac ku maansheeyoo
Miishmiishay fallaadho mowjad ahoo
Fad milliqsaday miidaddowsaday oo
Onkodku maqal gaaban meexaanshoo
Muyuusig garacay mahadho ah oo
Mii reeda ka taabtay meeldhexe oo
Madaha dhigtay mooshinkisii oo
Maaxaaya macsuun rabbaaniya oo
Nuurkaa mashaqeeyey maamulayoo
Macaansday malabki doocaan oo
Ku mahadnaqay maadhka uu helayoo
Mahdigii kelidii u soo marayoo
Mood iyo ka baqayn madoobaad oo
Quruxdaa miidhan iyo iftiinka mudhbaxay
Mariiqa fog iyo malluug an dhaweyn
Intay muxubbada muraaqoodeen
Markay martyeen masuug ma ahee
Midnimo ugu qaybshay miisaankoo
Dhammaan ka maseeyey maal bixintoo
Minankooda ku siiyey muunada,
Shan kastoy muunaddaa indhuu mahadshaan

Intaasi madad iyo marqaan ma lahee
Waxaan marag iyo markhaati ka ahay
Mudanow nabigaa ka muuq dheer.

Masalo adag oo minhaajka ku taal
Marsada cilmiga ah muftaa furfura
Marwada fiican baa majeero geyda
Hashii mohollinaa marti deeqda
Soorta na milixdaa macaanaysa
Rag baa maxaada oo mataano roga
Suugaanta mugga weyn in baa murdisse
Anigu ma aqaan murtida la tirshee
Shantayda midh waan mutuhinaayee
Maansada aan luggooyo miimka ah.

Maqdis baa looga yeedhay Maxamuudoo
Geenyaa sida miig cirkaa la martoo
Malaggii la socdaa iskaga maagoo
Madashii carshiguu macsuun ku noqdo
Millad baa Rabbigeen muhiimsiiyoo
Quraankoo mucjiso ah ayuu mulkiyoo
Maskaxdii dunidoo masuulka dhabta ah
U macallin ah meytii iyo xay
Mowlahaan kor u qaaday magaciisoo
Waxaan marag iyo markhaati ka ahay
Makhluuqa in uu u mudanyahay.

Hadraawaa mahwiyyoo xaqeeda marshoo
Dacar baa sida mayl madfaca laliyoo
Guuleed buu ku mannaystay mowluhuyoo
Axmed baa hal-muceedka miisaamoo
Qays baa sida mayey u maansheeyoo
Meexaamiye Aadan baa mudh-baxshoo
Dheeg baa manka iyo midhaa ka gurto
Tix-maalka Calaa mahoobiyyeyoo
Markuu maago Muuse loo ma hayoo
Shaacir baa majaraha u miina-dayee
Aniga maarrabaygu meel ma tagoo
Illeen ma aqaan murtida la tirshee

Shantayda midh waan mutuhinaayee
Maansada aan luggooyo miimka ah.

Mushaaxa iftiinka maalmo yar
Aadmiga marayaa ma waaraayo
Mulkiile markuu adduunka masaxo
Makhluuqu dhammaan maxsahrka tubanyahay
Dadkoo muddug ahi maryo xidhnayn

Surmiyo macaluul la miinyo xunyee
Milicdu u timaaddo madaxyada ee
In maalliyo kii madhnaan jiray iyo
Intii madax iyo miskiinnada
Dhammaan massoyiin midna ba wax ahayn
Naf iyo wax ay mudan ismoogyiin
Loo miiso wax ay mutaysteen
Xubnuhu mudduci iyo markhaati noqdaan
Maalintaan muran iyo makeeki jirayn
La kala madho muumin iyo gaal
Abaal-marin muhannigaa siyoo
Muslinku waxay heli mushaharkoodee
Muftaaxa Jahannama munaafaq sitiyo
Murtadka urayee malcuunnada
Mulxidka ragga yidhi ismehersada ee
Galmada ka matala muwaashiga ee
Macsida ku sameeya miidaanke
Toddoba marxal oo mid ciid tahay
Kalaabta laga maydho muudasada ee
Allaha Maaligga ah ma jiro yidhi ee
Minhaajyada dhigay musqulihiiyee

Gaalada mardafka leh Ilaah madhi
Mursalka Alle doortayoo Maxamed ah
Midh laga waaga eed marmariya leh
Kuwaasi musiibo waw madhaxoo
Ayagaa ku macsuuman naaro mug lehe
Macbuudka Allee aan magansanayow
In kastoon Maka iyo Madiinaba tegey
Faralka ka maqnaan maskiiddada
Soonka na ku mitido markaan ladanahay
Sakada ku masuugin maal-hayn
Ma moogi inaan madmadow badanoo
Miciinkaagu waa mid mowjadahoo
Addoon ku martyey mindhaa ma qadee
Dembigaannu maleegnay naga maydhoo
Dhammaan muslimiinta maamuusoo
Jannadaada macaan ha noo miyin

WARBIXIN KOOBAN

BARNAAMIJYADII UDAMBEEYEY

**“Hargeysa iyo Habeenka
Cabdillaahi Xasan Ganay”**

18/08/2017

Daaddihiye:

Rooble Cabdi Muuse

Goobta:

Maansoor Hotel

Cabdillaahi Xasan Ganey waxa uu ka mid yahay halabuurka suugaanyahanka ah ee Somaliland. Cabdillaahi waxa uu in muddo ah ka maqnaa dalka. Wuxuu suugaantiisa ku suntan arrimaha bulshada intooda badan ka soo tirihey dalka Marayanka. Cabdillaahi waxa kale oo uu aad caan ugu yahay samaynta heesaha, kuwaas oo ay qaadaan fannaaniin tiro badan. Barnaamijkani waxa uu ahaa kii u horreeyey ee uu dalka ku qabto sannadka 2017-ka. Wuxa ka soo qayb galay dhallinyaro aad u tiro badan oo xiisaynayey suugaantiisa.

Sidoo kale waxa uu barnaamijkani u gudbay gobolka Togdheer, caasimaddiisa Burco. Barnaamijkaas Burco waxa Cabdillaahi X. Ganey ku wehelinyey abwaan Cabdiraxmaan Abees iyo abwaan Xasan Daahir “Weedhsame.” Maa-lintan oo ku beegnayd 25-kii Agoost 2017 ayaa waxa ka soo qayb galay tiro ka badan 900 oo qof.



Dhallinyarta iyo Ganacsiga

07/09/2017

Daaddihiye:

Khalid Maxamed Siciid

Goobta:

Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa

Ma qasab baa in aad cid u shaqaysa, adiga oo adigu iskaa u shaqaysan kara? Inta badan, dadku waxa ay raadiyaan shaqo, shaqo dalkeenna aad u adag in la helo, iyada oo laga yaabo in qofkani uu si fudud isagu shaqo u abuuri kari lahaa. Si aad adigu shaqo u abuurto, dabcan waxa la rabaa in aad marka hore la timaaddo fikirkii, ka dibna fulintiisa. Dad badan oo dhallinyaro u badan ayaa laga yaabaa in ay hayaan fikirro waxku-ool ah, sidaas oo ay tahay, ma fuliyaan. Sababta dhowr waxyaabood ayaa lagu sheegaa. Midka ugu weynina waa in aanu qofku lahayn geesinnimadii uu ku fulin lahaa arrintaas. Haddaba si loo dhiirri geliyo dhallinyarta, waxa barnaamijkan marti ku ahaa Xasan Ibraahin oo lagu naanayo “Dhakajebiye”, ahna magaca shirkadda uu ka socdo iyo Khayre Ibraahin oo ah mulkiilaha shirkadda “Brandkii”.

Xasan waxa uu baadhitaan ku sameeyey shaaha magaalada lagu cabbo, waxaanu xaqiqsaday in aanu suuqa ka heli karin shaaha guriga lagu sameeyo oo kale. Taasi waxa ay ku dhalisay in uu xambaarto falaas weyn oo uu ka buuxo shaah uu dhadhankiisa hubo, suuqyada magaaladana uu la wareego.

Xasan oo ah mataanka Xuseen ayaa ka warramay sidii loo la yaabay walaalkii markii isaga oo qurbaha ka yimid uu magaalada Hargeysa



shaah la wareegay, balse markii dambe loo bogay. Taasi waxa ay markii dambe dhalisay in shaqaale cusub la qoro, magaaladana lagu faafiyoo.

Khayre Ibraahin oo soo bartay cilmiga loo yaqaanno “Electronic Commerce” ayaa arkay baahida loo qabo in ay shirkaduhu yeeshaan astaan iyo magac u diiwaan gashan oo u gaar ah. Taasi waxa ay ku dhalisay in uu sameeyo shirkadda Brandkii oo ka caawisa in shirkaddu ama ururku uu yeesho astaan aan u ekayn boqollaalka kale ee isku wada eg. Loo diiwaan geliyo, si fududna ugu noqoto baadisooc.

Caweyskan oo ahaa mid roob weyni ka da’ayey magaalada ayaa haddana ahaa mid aanu roobku celin dhallinyartii ka soo qayb galaysay si ay wax uga korodhsadaan, iyaga oo dharkoodu qoyan yahayna ay su’aalo aan dhammaad lahayn weydiinayeen.

Caweyska Suugaanta

09/09/2017

Daaddihiye:

Yaasmiin Maxamed Kaahin

Goobta:

Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa

